



# MACLUUMAAD URURIN

Somali

Si siwanaagsan wax looga qabto baahiyaha dadka cusub ee Canada yimid

Hay'adda Muwaadinnimada iyo socdaalka Canada (Citizenship and Immigration Canada / Citoyenneté et Immigration Canada (CIC)) waxay muhaajriinta, oo ay ku jiraan qaxootiga, ka caawisaa in ay dagaan Canada. Si tan loo sameeyo, waxaan maalgalinaa ururada wadankoo dhan si ay u siyyaan adeegyo soo galootiga cusub sida tababar luuqadeed iyo kala talinta xirfadaha. Si loo xaqiijiyo in dadka cusub ee yimaada ay u helaan adeegga saxda ah, waxaan u baahanahay caawintaada.

Ururada ay maalgaliso CIC ee ku siyya adeegyadan waxay ku waydiin doonaan inaad siiso xoogaa macluumaad shakhsiyeed ah: magacaaga oo buuxa, taariikhda dhalashada, lambarka socdaalka ama dukumentiga socdaalka. Waxaan kugu boorinaynaa inaad keento macluumaadkan marka lagaa codsado.

Ururka adeegga ku siyya ayaa macluumaadkan siinaya CIC da. Inta lagu guda jiro hawshan macluumaadkaaga waxaan u ilaalinaynaa si sir ah. Macluumaadkaaga shakhsiyeed looma isticmaali doono ujeeddo kale iyadoon la haysan ogalaanshahaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad waydiisato adeeg bixiyahaaga inuu ku tuso macluumaadkan waqtii kasta.

## Maxay CIC u ururisaa macluumaad shakhsiyeed

CIC waxay macluumaadka shakhsii ahaaneed u ururisaa si ay si wanaagsan ugu fahamto baahiyaha dadka soo galootiga ah. Macluumaadkan, ayaan ku xaqiijin karnaa in ururrada bixiya adeegyadu si fican wax u qabtaan, go'aan uga gaari karaynaa sida aan kor ugu qaadi karno adeegyada aan maalgelinno, aan dadweynaha ugu wargelin karaynaa sida ay barnaamijyadeennu u shaqeynayaan. Si kuwaan oo dhan guul looga gaaro, waxaan isu geyneynaa macluumaadka ku saabsan adeegyada aad u baahan tahay iyo adeegyada aad isticmaashay oo ay la socdaan faahfaahinnada aad bixisay markii aad codsaneysay in aad timaaddo Canada.

Ururada adeegga bixiya waxay u isticmaalaan

macluumaadkan inay ka cawiso qorshaynta iyo maarynta barnaamijyadanada iyo adeegyada laguu qabto.

Marka, macluumaadkaagu waxay naga caawiyaan xaqiijinta in adeegyadu ay baahidaada kugu haboon yihiin.

## Macluumaadkaaga shakhsiyeed waa la ilaalinayaa

Iyadoo ay CIC leedahay awoodda ay ku ururineyo macluumaadkaaga shakhsiyeed sida uu qabo Xeerka Ilaalinta Socdaalka iyo Qaxootiga (*Immigration and Refugee Protection Act / Loi sur l'immigration et la protection des réfugiés*), sharciga Canada ee dhowridda xuquuqda waxa qofka u gaarka ah wuxuu u baahan yahay in dowladda fadaraalku ay ilaalso macluumaadkaaga shakhsiyeed. Macluumaadkaaga lalama wadaagi karo cidna marka laga reebo inta uu oggol yahay Xeerka Waxa Qofka u Gaarka ah (*Privacy Act / Loi sur la protection des renseignements personnels*). Wixii macluumaad dheeri ah, ka fiiri <http://laws-lois.justice.gc.ca/eng/acts/P-21/page-3.html#h-6>.

Macluumaadka shakhsiyeed eed bixiso waxaa lagu kaydiyaan bangiga macluumaadka shakhsiyeed, waa nooc ka mid ah meelaha xogta lagu kaydiyo, oo loo yaqaan Adeegyada Deegaamaynta iyo Isdhexgalka (*Settlement and Integration Services / Services d'établissement et d'intégration*). Waxaa sidoo kale ku jira xoogaa macluumaad ah ood bixisay markaad soo codsatay imaanshaha Canada. Bangigan waxaa iska leh Dowladda Canada. Si aad wax uga ogaato noocyada macluumaadka shakhsiyeed ee lagu hayo bangiga Adeegyada Deegaamaynta iyo Isdhexgalka (PIB # CIC PPU 062), fiiri

wixii faahfaahin ah, fiiri  
[www.cic.gc.ca/english/department/atip/index.asp](http://www.cic.gc.ca/english/department/atip/index.asp)

© Her Majesty the Queen in Right of Canada, represented by the Minister of Citizenship and Immigration, 2013



Citizenship and Immigration Canada

Citoyenneté et Immigration Canada

Canada



<http://www.cic.gc.ca/english/department/atip/infosource/pibs.asp>

Waxaad ka arki kartaa kaydka qoraalkaaga CIC ee macluumaadka shakhsiyeed adigoo sameynaya codsi awood u yeelasho macluumaad ama codsiga Xeerka Waxa Qofka u Gaarka ah. wixii faahfaahin ah, fiiri

[www.cic.gc.ca/english/department/atip/index.asp](http://www.cic.gc.ca/english/department/atip/index.asp)

